MINNESOTA
FRONTLINE WORKER PAY

FAQs (Su'aalaha Inta Badan la Waydiiyo) Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore Diidmada iyo Racfaanada

Macluumaadka guud

1. Arjiga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore waa la xidhay, maxaa xiga?

Hadda maadaama oo arjiga lacagsiinta shaqaalaha safka hore xirmay, arjiyada la soo gudbiyay waxa howlgelin doonta oo xaqiijin doonta Waaxda Shaqada iyo Warshadaha, Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha, iyo Waaxda Dakhliga. Howlgulinta iyo xaqiijinta kadib, dhammaan codsadayaasha waxaa lagu ogeysiin doonaa email ahaan in aan tallaabo kale loo baahnayn ama in codsigooda la diiday oo ay xaq u leeyihiin in ay ku soo gudbiyaan rafcaan 15 ka maalmood ee soo socda ee muddada rafcaannada, taas oo la filayo in ay noqoto Talaadada. Agoosto 16, ilaa Arbacada, Agoosto. 31, 2022, saacadu markay tahay 5 p.m. (CT).

2. Sidee iyo goorma ayaa diidmada loo soo gudbin doonaa?

Dhammaan diidmooyinka waxaa lagu soo gudbin doonaa email. Farriimaha emailka diidmada ah waxaa la filayaa in la diro Agoosto. 16, 2022. Fariinta emailka ee soo ogeysiinaysa codsadaha diidmada waxaa loogu soo diri doonaa ciwaanka emailka loo isticmaalay in lagu sameeyo akoonka codsadaha ee Submittable markii ugu horeeyey ee loo isticmaalay in lagu codsado Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore. Emailka soo sheegaya diidmada waxa ku jiri doona link-ga lagu galo akoonka Submittable ee codsadaha halkaas oo ay ka heli karaan foomamka racfaanka ee la xiriira sababta diidmada ee cayiman.

3. Maxay yihiin sababaha aan la iigu soo diri karo u diidmada lacagsiinta shaqaalaha safka hore?

Codsiyada waxaa lagu diidi doonaa sababaha soo socda awgood waxayna xaq u leeyihiin rafcaan.

- Codsaduhu wuxuu ka sarreeyaa heerka caymiska shaqo la’aanta ee lagu dejiyay sharciga.
- Codsaduhu wuxuu ka sarreeyaa heerka dakhliga guud ee la hagaajiyay ee lagu dejiyay sharciga.
- Lama xaqiijin karo u qalmitaanka shaqo ee codsadaha.
- Codsadaha waxa loo arkay in uu ku laba ceshi yahay Tani waxay ka dhigan tahay in wax ka badan hal arji oo wata isla lambarka Sooshal Sakuuratiga ama Lambarka Aqoonsiga Cashuur bixiyaha la soo diray.
- Aqoonsiga codsadaha lama xaqiijin karo

4. Waa maxay foomka racfaanku?

Foomka rafcaanku waa foomka khadka internetka ku jira oo ay tahay in si guul leh loo gudbiyo si rafcaan looga qaato go'aanka diidmada. Macluumaadka looga baahanyahay foomka racfaanku waxay ku xirnaan doontaa sababta diidmada. Sabab kasta oo diidmo ah waxay leedahay foom rafcaan oo u dhigma oo laga heli karo akoonnka Submittable ee codsadaha. Haddii aadan dhammaystirin oo aadan si guul leh ugu soo dirin dhammaan

foomamka racfaanka 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda fariinta email-ka diidmada ah, u diidmadu waxay noqon doontaa kama dambays.Waxaa la filayaa in fariimaha emailka diidmada ah la soo diri doono Agoosto 16, 2022, markaas oo dhammaan foomamka rafcaanka ay tahay in la soo gudbiyo ugu dambayn Agoosto. 31, 2022, saacadu markay tahay 5 p.m. (CT).

5. Xagee ayaan ka heli karaa foomamka racfaanka ee aan u baahanahay inaan buuxiyo?

Dhammaan foomamka racfaanka ee khuseeya arjigaaga lacagsiinta shaqaalaha safka hore waa in aad ku gasho akoonkaaga Submittable. Waxaad ka gali kartaa akoonkaaga Submittable https://manager.submittable.com/user/submissions.

Kadib marka aad gasho akoonkaaga, guji shaashada "**Foomamka**." Haddii codsigaaga lagu diiday hal ama dhowr sababood, waxaad arki doontaa foomka racfaanka ee sabab kasta oo diidmo ah. Guji badhanka **"Magpatuloy"** ee ku dhinac xiga foomamkaaga racfaanka. Haddii aad aragto foomam badan, **waa inaad soo dirto dhammaan foomamka si aad u dhammaystirto racfaankaaga**.

Haddii aadan dhammaystirin oo aadan si guul leh ugu soo dirin dhammaan foomamka racfaanka 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda fariinta email-ka diidmada ah, u diidmadu waxay noqon doontaa kama dambays.

Foomamka rafcaanka ee aad si guul leh u soo dirtay dib ayaa loo eegi doonaa go'aanka kama dambaysta ahna waxaa laguugu soo sheegi doonaa email. Go'aanka racfaanku waa kama dambays.

6. Maxaa dhacaya haddii aanan xasuusanin furaha sirta ah ee akoonkayga Submittable?

Haddii aadan xasuusanin furahaaga sirta ah s, waxaad isticmaali kartaa link-ga "Illowday?" ee ku yaalla Submittable bogga "Sign In page."

Waxaa lagu waydiin doonaa inaad geliso ciwaanka emailkaaga (hubi inuu yahay ciwaanka emailka ee la xiriira akoonkaaga Submittable). Guji badhanka **"Diri Tilmaamaha."** Waxaad email ka heli doontaa Submittable.

Gujinta link-ga ku jira emailka ayaa wuxuu ku gayn doona foomka **"Dib u Samee Furaha sirta ah."** Haddii link-gu shaqayn waayo, waxaad koobiyeyn kartaa oo aad barta cinwaanka la geliyo ee browserka aad dhigi kartaa URL-ka ku jira fariinta.

Ka dib marka aad gasho boga foomka "**Dib u Samee Furaha sirta ah,"** ku qor furahaaga sirta ah ee cusub. Furaha sirta ah waa in dhererkoodu yahay siddeed xaraf oo ugu yaraan laba ka mid ah kuwan ayaa looga baahan yahay:

- xarfo far waaweyn ah;
- xarfo far yaryar ah;
- lamabarro; ama
- calaamado.

7. Ma in aan foomka racfaanka khadka internetka ku soo diraa?

Haa, habka rafcaanka waxaa laga heli karaa oo keliya khadka internetka. Haddii aad u baahan tahay kaalmada foomamka racfaankaaga, kala soo xiriir xarunta taageerada codsadaha mnfrontlinepay@submittable.com ama 866-333-7633.

8. Muddo intee dhan ayaan haystaa in aan soo diro foomamka racfaankayga?

Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore ayaa dhigaya in codsaduhu uu racfaan ka qaadan karo diidmada u qalmitaanka 15 maalmood gudahooda marka la soo ogeysiiyo diidmada. Waxaan filaynaa in fariimaha emailada ee diidmada ah la soo diri doono Agoosto. 16, 2022, taas oo macnaheedu yahay dhammaan rafcaannada waa in la soo gudbiyo Agoosto. 31, 2022, saacadu markay tahay 5 p.m. (CT).

9. Maxaa dhacaya haddii aanan soo dirin racfaan wakhtigii ku haboonaa?

Waxaan filaynaa in fariimaha emailada ee diidmada ah la soo diri doono Agoosto. 16, 2022. Haddii aad heshay diidmo oo aadan buuxinin oo aad si guul leh u soo gudbinin dhammaan foomamka racfaanka ee la xiriira ugu dambayn 5 p.m. (CT) Agoosto 31, 2022, racfaankaaga waa la diidi doonaa. Diidmada waxay noqon doonta kama dambeys

10. Sideen ku hubin karaa inaan qaaday dhammaan tillaabooyinka lagama maarmaanka ah si aan racfaan uga qaato diidmada arjigayga?

Si aad u aragto in aad dhammaystirtay dhammaan tillaabooyinka lagama maarmaanka ah si aad rafcaan uga qaadato diidmada arjigaaga, waa inaad gasho akoonkaaga Submittable ee laga galo https://manager.submittable.com/user/submissions.

Kadib marka aad gasho akoonkaaga, guji shaashada **"Foomamka."** Haddii codsigaaga lagu diiday hal ama dhowr sababood, waxaad arki doontaa foomka racfaanka ee sabab kasta oo diidmo ah. Haddii uu ku yaallo badhanka **"Magpatuloy"** oo ku ag yaalla foomamka racfaankaaga, weli ma aadan soo dirin racfaankaaga.. Riix badhanka "**Magpatuloy"** ee ku xiga foom kasta, buuxi foomka oo soo dir foomka. **Waa inaad soo dirto dhammaan foomamka si aad u buuxiso racfaankaaga**. Kadib marka aad dirto foomka, badhanka **"Magpatuloy"** wuu baaba'ayaa oo foomku waxa uu noqonayaa mid aan shaqaynayn oo u muuqan doona cawl.

Haddii aadan dhammaystirin oo aadan si guul leh ugu soo dirin dhammaan foomamka racfaanka 15 maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda fariinta email-ka diidmada ah, u diidmadu waxay noqon doontaa kama dambays.

11. Ma helin fariin email diidmo ah, laakiin waxaan rabaa inaan hubiyo in arjigayga wali la tixgelinayo oo aan la diidin. Sidee ayaan u eegi karaa xaalada arjigeyga?

Si aad u aragto in arjigaaga uu ku jiro in laga shaqaynayo oo aad u xaqiijiso in aan tallaabo kale loo baahnayn, waa inaad gasho akoonkaaga Submittable ee laga galo https://manager.submittable.com/user/submissions.

Kadib marka aad gasho akoonkaaga, guji shaashada **"Forms" ("Foomamka")**. Haddii aysan ku jirin foomamka rafcaanka qaybta **"Foomamka**", taasi waxay ka dhigantahay tahay codsigaaga wali waa laga shaqaynayaa oo tallaabo dheeraad ah looma baahna.

Haddii codsigaaga lagu diiday hal ama dhowr sababood, waxaad arki doontaa foomka racfaanka ee sabab kasta oo diidmo ah. Haddii uu ku yaallo badhanka **"Magpatuloy"** oo ku ag yaalla foomamka racfaankaaga, waxaad u baahan tahay inaad buuxiso foomka racfaanka. Riix badhanka **"Magpatuloy"** ee ku xiga foom kasta, buuxi foomka oo soo dir foomka. **Waa inaad soo dirto dhammaan foomamka si aad u buuxiso racfaankaaga**. Kadib marka aad dirto foomka, badhanka **"Magpatuloy"** wuu baaba'ayaa oo foomku waxa uu noqonayaa mid aan shaqaynayn oo u muuqan doona cawl.

12. Goorma ayaan heli doonaa go'aanka ku saabsan racfaankayga?

Rafcaannada waxaa loo howlgelin doonaa sida ugu dhakhsaha badan. Kadib marka dhammaan rafcaannada la soo gudbiyay la howlgeliyo, go'aamada kama dambaysta ah email ahaan ayaa lagu ogeysiin doonaa codsadayaasha.

Rafcaannada la xiriira heerka inta aad qaadatay caymiska shaqo la'aanta

1. Macluumaad maxay ah ayaan u baahanahay inaan bixiyo si aan rafcaan uga qaato diidmada ku salaysan helitaanka toddobaadyo badan oo nacfiyada caymiska shaqo la'aanta ah?

Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore wuxuu bixiyaa go'aaminta u qalmitaanka ee la xiriirta heerka lacag bixinta caymiska shaqo la'aanta iyada oo lagu salaynayo xogta ay hayso Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Minnesota (DEED). Haddii codsaduhu uu qaatay in ka badan 20 toddobaad oo nacfiyada caymiska shaqo la'aanta ah intii u dhaxaysay Maarso 15, 2020, iyo Juun 26, 2021, codsaduhu uma qalmo Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore.

Waxaad u baahan doontaa inaad ku bixiso lambarkaaga sooshal sakuuratiga foomka rafcaanka si aan mar labaad u hubinno tirada toddobaadyada aad heshay nacfiyada caymiska shaqo la'aanta. Waxa kale oo aad u baahan doontaa inaad sharaxdo sababta aad ugu malaynayso inaad heshay toddobaadyo nacfiyada caymiska shaqo la'aanta oo ka yar inta ay sheegayaaso diiwaanka DEED. Ugu dambeyntii, waxaad u baahan doontaa inaad caddeyso in macluumaadka aad bixisay ay run iyo sax yihiin.

2. Sideen u hubin karaa tirada toddobaadyada ee nacfiyada caymiska shaqo la'aanta ee aan helay muddada ku habboon?

Waxaad hubin kartaa tirada toddobaadyada nacfiyada Caymiska Shaqo la'aanta ee aad heshay intii u dhaxaysay Maarso 15, 2020, iyo Juun 26, 2021, adiga oo gelaya akoonkaaga UI oo gujinaya link-ga Shaqaalaha Safka hore ee bogga akoonkaaga. Tilmaamaha sida loo galo akoonkaaga UI oo loo helo bogga shaqaalaha ee Safka hore waxaa laga heli karaa websaydka Caymiska Shaqo la'aanta Minnesota ee ah www.uimn.org/frontline-worker.

Rafcaannada la xiriira heerka dakhliga guud ee la hagaajiyay

1. Waa maxay sababta aan u helay Foomka Racfaanka ee AGI?

Iyada oo ku salaysan macluumaadka aad bixisay, arjigaagii Lacagsiinta Shaqaalaha Safka hore waa la diiday sababta oo ah diiwaanadayadu waxay muujinayaan dakhligaaga guud ee la hagaajiyay (AGI) ee sannadaha cashuuraha 2020 iyo 2021 in uuna buuxin shuruudaha u qalmitaanka ee uu dhigayo sharciga lacagsiinta shaqaalaha safka hore.

Si uu xaq ugu yeesho, AGI-ga shaqaaluhu	**Waa inuu ka yaraadaa**
Marka qofku lahaa mas'uuliyadaha daryeelka bukaanka COVID-19	$350,000 qoyska isqaba ee isku xaraysanaya $175,000 dad si kale u xaraysta

Marka qofku uuna lahayn masuuliyadaha daryeelka bukaanka COVID-19 ee tooska ah	$185,000 qoyska isqaba ee isku xaraysanaya $85,000 dad si kale u xaraysta

2. Macluumaad maxay ah ayaan u baahanahay inaan bixiyo si aan rafcaan uga qaato diidmada ku salaysan in aana buuxinin shuruudaha xaddidaadda dakhliga guud ee la hagaajiyay??

Waa inaad keento ugu yaraan mid ka mid ah dukumentiyadan sanad cashuureedka 2020 iyo/ama 2021:

- Foomamka IRS 1040 ee laga xareeyey IRS;
- Diiwaanka canshuur celinta IRS;
- Diiwaanka akoonka IRS; ama
- Diiwaanka mushaharka iyo Dakhliga ee IRS.

Bixinta wax ka badan hal dukumeentiyadan ah ayaa waxay wanaajin kartaa suurtogalnimada inaad ku guulaysato racfaanka. Ugu dambeyntii, waxaad u baahan doontaa inaad caddeyso in macluumaadka aad bixisay ay run iyo sax yihiin.

3. Sideen u codsadaa diiwaanka IRS?

Ka codso diiwaanka IRS bogga websaydka IRS ee IRS Get Transcript (Hel Diiwaanka IRS).

Si lagaaga caawiyo helitaanka diiwaanka, booqo Get Transcript FAQs (Su'aalaha la iska waydiiyo helitaanka IRS).

Si aad ugu si dhakhso leh ugu hesho diiwaankaaga, isticmaal fursadaha khadka internetka ah.

4. Waa maxay noocyada kala duwan ee diiwaanada IRS?

Liistada IRS waxay haysaa oo qeexdaa kala duwanaanshaha noocyada diiwaanada iyo websaydka siyaabaha loo dalbado.

Rafcaannada la xiriira xaqiijinta shaqaalaynta

1. Macluumaadkee maxay ah ayaan u baahanahay inaan bixiyo si aan racfaan uga qaato diidmada ku saleysan shaqaalaynta?

Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore waxa uu dhigayaa, shuruudaha in, si uu xaq ugu yeesho Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore, shaqaaluhu wuxuu u baahan yahay in la shaqaaleysiiyo ugu yaraan 120 hal mid ama wax ka badan oo ah waaxaha safka hore muddada laga bilaabo Maarso 15, 2020, oo ku dhammaanaysa Juun 30, 2021. Sharcigu waxa kale oo uu dhigayaa in si uu xaq ugu yeesho, shaqaaluhu waa in uu awoodi waayay in uu guriga ku shaqeeyo nooca shaqada shakhsiga darteed ugu yaraan 120 saacadood oo uu ka shaqeeyay meel u dhow shakhsiyaad ka baxsan qoyska qofka ugu yaraan 120 saacadood.

Foomka rafcaanku wuxuu kaaga baahan doonaa inaad soo dirto macluumaad gaar ah si loo dhiso u qalmitaanka shaqada, oo ay ku jiraan Lambarka Sooshal Sakuuratiga ama Lambarka Aqoonsiga Shakhsiga Cashuur Bixiyaha

iyo foomka W-2 ee sannad cashuureedka 2020 ama 2021 ama bayaanka dakhliga (jeega dabadiisa (paystub)) oo ka yimid wakhtiga ku habboon. Foomku wuxuu sidoo kale kuu ogolaanayaa inaad sharaxdo sababta aad u aaminsan tahay in diidmada ku salaysan shaqaalayntu in ay khalad tahay. Ugu dambeyntii, waxaad u baahan doontaa inaad caddeyso in macluumaadka aad bixisay ay run iyo sax yihiin.

2. Waxaan ahay qof degan Minnesota oo ka shaqeeyay waaxaha safka hore, laakiin shaqadayda waxaan ku qabtay meel ka baxsan gobolka. Maxaa diidmada la iigu soo diray?

Shuruudaha u qalmitaanka ee sharciga lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore waxaa ka mid ah in "ka shaqaynaysay ugu yaraan 120 saacadood Minnesota hal mid ama wax ka badan oo ah waaxaha safka hore muddada laga bilaabo Maarso 15, 2020, oo ku dhammaanaysa Juun 30, 2021" Shuruudaha u qalmitaankan ayaa u baahan in ugu yaraan 120 saacadood oo shaqadu ay ahaato gobolka Minnesota.

3. Waxaan ka shaqeeyaa waaxaha safka hore aniga oo ah mulkiilaha keli ah ama qandaraasle madax bannaan. Maxaa diidmada la iigu soo diray?

Shuruudaha u qalmitaanka ee sharciga lacagsiinta shaqaalaha safka hore waxa ka mid ah shardiga ah in shaqaalaha “la shaqeeyey.” Qandaraaslayaasha madaxa banaan iyo mulkiilayaasha keligood ah ma aha shaqaale, sidaas darteed, uma qalmaan Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore.

Rafcaannada la xiriira laba jeer soo dirsasho

1. Macluumaadkee maxay ah ayaan u baahanahay inaan bixiyo si aan racfaan uga qaato diidmada ku saleysan laba jeer soo dirsasho?

Iyada oo qayb ka ah borotokoolka ka hortaga khiyaanada ee Barnaamijka Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore, gobolka Minnesota waxa uu hubinayaa in hal lacag oo keliya la siin doono shaqaale kasta oo u qalma. Arjiyada loo arko in ay yihiin ku laba celis marka loo eego lambarada Sooshal Sekuuritiga ama Lambarada Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha waa la diidi doonaa. Si loo hubiyo inaanu ansixinay arjiga la xiriira shaqaalaha safka hore, foomka rafcaanku wuxuu u baahan doonaa Lambarka Sooshal Sakuuratiga ama Lambarka Shakhsi ee Aqoonsiga Cashuur Bixiyaha iyo xaqiijinta aqoonsiga. Foomku wuxuu sidoo kale kuu ogolaanayaa inaad sharaxdo sababta aad u aaminsan tahay in diidmada ay khalad tahay. Ugu dambeyntii, waxaad u baahan doontaa inaad caddeyso in macluumaadka aad bixisay ay run iyo sax yihiin.

Rafcaannada la xiriira xaqiijinta aqoonsiga

1. Macluumaadkee maxay ah ayaan u baahanahay inaan bixiyo si aan racfaan uga qaato diidmada ku saleysan xaqiijinta aqoonsiga?

Iyada oo qayb ka ah borotokoolka ka hortaga khiyaanada ee Barnaamijka Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore, gobolka Minnesota waxa uu xaqiijinayaa aqoonsiga dhammaan codsadayaasha. Haddii aad hesho foomka rafcaanka xaqiijinta aqoonsiga, waxa ka dhigan tahay in aanu awoodi waynay in aanu xaqiijino aqoonsigaaga. Foomka rafcaanka, waxaad ku caddayn kartaa aqoonsigaaga laba siyaabood midkood.

1. Aqoonsiga ku salaysan aqoonta (KBA): Habka KBA wuxuu u baahan yahay macluumaadka aasaasiga ah, sida magaca, cinwaanka iyo taariikhda dhalashada, kuwaas oo loo isticmaali doono in lagu soo diyaariyo su'aalaha aqoonta.

2. Xalka xaqiijinta aqoonsiga: Xalka xaqiijinta aqoonsiga ayaa waydiin doona codsadaha inuu xaqiijiyo aqoonsigiisa isagoo soo sawiraya dukumeentiga aqoonsiga ee u qalma (baasaboor, kaarka aqoonsiga, shatiga darawalnimada ama ogolaanshaha deganaanshaha) oo iska qaadaya sawir isla wakhtigaas ah. Liiska dukumeentiyada aqoonsiga ee u qalma ayaa laga heli karaa khadka internetka: Liiska dukumentiyada la ogolyahay (List of supported documents – Veriff).

Ugu dambeyntii, waxaad u baahan doontaa inaad caddeyso in macluumaadka aad bixisay ay run iyo sax yihiin.

FAQs (Su'aalaha Inta Badan la Waydiiyo) Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore

1. Sidee ayaan ku heli karaa wixii kasoo cusboonaada arjigayga?

Ka gal akoonkaaga Submittable https://manager.submittable.com/user/submissions si aad u aragto waxa cusub.

2. Ka waran haddii aan khalad sameeyey dhanka qoraalka ciwaanka emailka?

Haddii aad rabto in aad saxdo khaladka dhanka qorista ah, isticmaal tilmaamaha ku jira https://submittable.help/en/articles/2441500-how-can-i-change-the-email-address-associated-with-my-submittable-account si aad u cusboonaysiiso diiwaankaaga.

3. Waxaan isku dayay in aan la xiriiro xarunta taageerada codsadaha intii lagu jiray xilliga racfaanka. Goorma ayaan jawaab ka heli doonaa?

Haddii aad noo reebtay fariinta codka taleefanka ah, waxay nagu qaadan doontaa wakhti dheer inaan ka soo jawaabno. Si aad u hesho jawaab degdeg ah, kala soo xiriir xarunta taageerada codsadaha mnfrontlinepay@submittable.com.

4. Goorma ayaan ogaan doonaa haddii la ii doortay in aan lacag helo?

Ogeysiisyada la xiriira lacagsiinta ayaa la filayaa dayrta, ka dib xilliga racfaanka iyo xilliga falanqaynta.

5. Sidee ayaan u beddelaa macluumaadka akoonkayga bangiga lacagta lagu shubayo?

Waxaad u baahan doontaa inaad sugto ilaa wakhtiga lacag bixinta. Macluumaadka akoonka bangiga waxa kaliya oo la bedeli karaa kadib marka isku daygii ugu horeeyay ee lacag in lagu shubo akoonka lagu guuldaraystay. Kadib, codsaduhu wuxuu heli doonaa fariin email ah oo ay ku jirto link si uu u galo akoontiga Submittable ee codsadaha halkaas oo ay ka heli karaan foom si ay u cusbooneysiiyaan macluumaadka akoonkooda bangiga.

6. Intee in le'eg ayuu codsade kasta oo u qalmaa heli doonaa oo goorma ayuu heli doonaa?

Ma ogaan doonno inta uu codsade kastaa heli doono ilaa rafcaannada laga laga shaqeeyo. Lacagta loogu talagalay Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore ayaa waxa loogu qaybin doonaa si siman dhammaan shaqaalaha safka hore ee xaqa u leh ee arjigooda la ogolaaday. Lacagta waxaa la filayaa in la bixiyo dayrta 2022.

7. Maxaa dhacaya haddii loo shaqeeyaha aan u shaqeeyay xilligii xaaladda degdega ah ee wakhtiga nabadu uuna isoo ogaysiinin barnaamijkan?

Sharciga lacagsiinta shaqaalaha safka hore ma siin awooda dhaqangelinta Waaxda Shaqada iyo Warshadaha ee Minnesota oo la xiriirta waajibaadka ogeysiista loo shaqeeyaha.

8. Maxaa dhacaya haddii aan beddesho loo shaqeeyayaasha inta lagu jiro ama kadib xaalada degdega ah ee xilliga nabada oo loo shaqeeyahaygii hore uuna marnaba isoo ogeysiinin barnaamijkan?

Sharciga Lacagsiinta Shaqaalaha Safka Hore wuxuu kaliya uga baahanyahay loo shaqeeyayaasha waaxyaha safka hore inay ogeysiiyaan shaqaalaha hadda jira ee u qalmi kara lacag bixinta. Loo shaqeeyayaashu mas'uul kama ahayn in ay ogeysiiyaan shaqaalihii hore barnaamijka ama u qalmitaanka suurtagalka ah.

9. Sideen rafcaan uga qaadan karaa haddii aan is diiwaangeliyay laakiin aanan arji ku soo dirsanin nidaamka?

Haddii arjiga aan la soo dirin iyadoo la isticmaalayo arjiga khadka internetka ku jira 5 p.m. (CT) Luulyo 22, 2022, ma jirto qaab lagu soo diro arji ama rafcaan looga qaato ku guuldaraysiga soo gudbinta arjiga.

10. Sideen racfaan uga qaadan karaa haddii aan soo diray email oo aan reebay fariinta cod taleefanka ah laakiin aan marnaba jawaab ka helin oo aanan awoodin in aan soo gudbiyo arji?

Sida sharcigu dhigayo, wakhtiga codsigu waxa uu furnaa muddo 45 maalmood ah mana awoodno in aanu aqbalno codsiyada kadib marka uu xirmo wakhtiga arjigu. Waxaanu filaynay tiro badan oo ah codsiyada taageerada codsadaha ah waxaana bixinaynay xarunta taageerada codsadaha dhammaan 45 maalmood ee wakhtiga codsiga laga bilaabo 8 a.m. illaa 8 p.m. Waxaanu awoodnay inaan u jawaabno oo aan taageero siino codsadayaasha muddada 45-ka maalmood ah ee codsiga, laakiin waxaa jiray tiro sarraysa oo codsiyada taageerada codsadaha ah labadii maalmood ee ugu dambeeyay ee xilliga codsiga. Nasiib darro, dhammaan codsadayaashu mayna awoodin inay helaan caawin saacadihii ugu dambeeyay ee barnaamijka. Haddii arjiga aan la soo dirin iyadoo la isticmaalayo arjiga khadka internetka ku jira 5 p.m. (CT) Luulyo 22, 2022, ma jirto qaab lagu soo diro arji ama rafcaan looga qaato ku guuldaraysiga soo gudbinta arjiga.

11. Goorma ayaan heli doonaa go'aanka ku saabsan racfaankayga?

Rafcaannada waxaa loo howlgelin doonaa sida ugu dhakhsaha badan. Kadib marka dhammaan rafcaannada la soo gudbiyay la howlgeliyo, codsadayaashu waxay heli doonaan fariin email ah oo ku saabsan go'aamada kama dambaysta ah dayrta.

12. Waxaan helay fariin email ah oo sheegaysa inaan soo diray arji, laakiin marnaba maana soo dirin. Maxaan u baahan nahay inaan sameeyo?

Kala soo xiriir xarunta taageerada codsadaha mnfrontlinepay@submittable.com si aan dib ugu eegno khayaanada suurtagalka ah. Waxaad ka noqon kartaa codsigaaga adiga oo galaya akoonkaaga adiga oo isticmaalaya tilmaamaha “Forgot” ("Illowday") furaha sirta ah.